



ethnic
communities'
council of
victoria

Golaha Jaaliyadaha Jinsiyeed ee Victoria Inc. (ECCV) waa hay'ada ugu sareysa ee ururada dhaqamada badan iyo jinsiga ee Victoria. Waa urur ku saleysan xubinimada bulshada ayna ka go'an tahay awood uyeelida dadka ka soo jeeda asalada dhaqamada badan ee kala duwan. Waxaanu ku hanweyn nahay inaan noqono udoodaha ugu muhiimsan ee jaaliyadaha dhaqan ahaan kala duwan ee Victoria ilaa iyo 1974. Wax ka badan 35 sanno waxaanu ahayn iskuxiraha u dhaxeeya jaaliyadaha dhaqamada badan, dawlada iyo bulsha weynta kale.

Waxaan leenahay guddi iskaa ku shaqeeya oo uu hogaaminayo guddoomiye iyo shaqaale aqoon leh oo wakhti buuxa shaqeeya oo ku wajahan matelida, u doodista, horumarinta siyaasada iyo awood dhisida. Ururku wuxuu metelaa danaha jaaliyadaha dhaqamada badan dhammaan heerarka dawlada sida meelaha xuquuqda bani;adamka, isticmaalka iyo sinaanta, hagaajinta adeegyada, cunsuriyada iyo kala soocida, wanaag kuwada noolaanshaha jaaliyada, shaqada, tababarka iyo waxbarashada, caafimaadka iyo adeegyada bulshada, iinta, ilaalinta ilmaha, sharciga iyo caddaalada, fanka iyo dhaqanka. Waxaa ka doodnaa arin kasta oo khuseysa xubnaheena, waxaana kaqornaa waraaqo qorshe ah oo arimo kala duwan ku saabsan marmarka qaarkood sameynta cilmi baaris markii ugu horeysay anagoo la shaqeynayna machadyada waxbarashada sare ee waaweyn.

Waxaan sidoo kale caawinaa dhisida awooda xubnaheena ururka ee ka soo jeeda jaaliyadaha cusub ama soo koraya anagoo siineyna tababar hogaamineed.

Tirada xubinimadeenu way ballaaran tahay kalana duwan yihiin. Waxay u furan tahay ururada xoogga saaraya jinsiyada ama dhaqamada badan, ururada daneynaya waxyaalaha, ama shakhsiyaadka taageera shaqadaan qabano. Sahami website keena si aad u hesho wax ku saabsan dhammaan waxyaalaha aan qabano galna "Xubin Noqo" (*Become a Member*) iyo wax ku saabsan website kan si aad u dalbato ku soo biirida ECCV. Waxaa lagugu martiqaadayaa inaad na soo wacdo si aad u ogaato waxyaalaha ku saabsan dhammaan waxaana qabano iyo sidaan u taageeri karno waxyaalaha ay jaaliyadaadu higsaneyso.

Haddii aad u baahan tahay turjumaan, fadlan wac Adeega Turjumaanka Afka iyo Qoraalka (TIS National) **131 450** oo weydiina inay kuu wacaan Golaha Jaaliyadaha Jinsiyada ee Victoria Inc. (03) 9349 4122. Saacadaheena shaqadu waa 9.00 subaxnimo – 5.00 galabnimo ee maalmaha isbuuca ee shaqada.

Ethnic Communities' Council of Victoria

150 Palmerston Street Carlton VIC 3053

Phone:9349 4122

Fax: 9349 4967

www.eccv.org.au